# HAGAHA FAAH-FAAHINTA ADEEGA MACMILKA

## Jadwalka Tusmooyinka

Hagaha Macmilka ............................Bogga 1

Faah-faahinta Adeegyada.................Bogga 2

Deegaanada......................................Bogga 2

Xaq-u-yeelka...................................... Bogga 3

Saacaha.......................................... Bogga 3

Xaquuqda  iyo waajibaadka.............. Bogga 4

Balamaha iyo Qaaditaanada.............Bogga 5

Baajinta Balamaha.............................Bogga 5

Kirada.......................................... Bogga 5

Goymaha Balamaha.......................... Bogga 5

Waxyaabaha kale ee la tix-geliyo......Bogga 5 8

Ku wareegida Gaadiidka kale.................Bogga 5 9

Xalinta Khilaafaadka Adeegyada............ Bogga 59

Daruufaha Gaar ah.............................Bogga 510

Rakaabka ay Xaqiijisay-ADA-................Bogga 5 10

Xayawaanka....................................... Bogga 5 11

Faystooyinka...................................... Bogga 5 11

Dalabyada Joogtada............................ Bogga 5 12

Transit Link waa gadiid dadweyne oo ka duwan gaadiidka dadweynaha ee caadiga ah oo ay heli karaan dadka ku nool dhamaan nawaaxigu si ay ugu tagaan shaqooyinka, balamaha dhaqaatiirta ama ay ugu tagaan goobaha faakihaysiga. Waxay u yihiin gaadiid meelaha gaadiidka dadweynaha caadiga ah aan inta badan laga helin amaba aananba laga helin. Qofka walba oo ku socdaalaya goobaha loo adeego ayaa isticmaali kara Transit Link hadii uu balan horey u sii qabsado.

Dhowr nooc oo gaadiidkan ah oo ka hawl-gala dhamaan agagaarkan oo dhan ayaa siiya adeegyo Transit Link. Waxaa jira shan waaxood oo adeeg, laakiin macaamiishu waa ku dhex safri karaan deegaandaa loo adeego gudahooda. Safarada qaarkood waxa ay u baahan yihiin ku wareegin gadiidka dadweynaha ee caadiga ah iyadoo lagu dajinayo rakaabka boosteejo gaadiid ama meel gawaariga gaarka loo leeyahay la dhigto ka dibna laga raaaco gaadiid dadweyne.

Macaamiisha Transit Link waxa ay fili karaan inay helaan qaadid amaan iyo nasteexo ba leh kolka ay saaran yihiin baska. Shaqaalahayaga edebta iyo xirfada lehi waxa ay kaa caawin doonaan sameysiga balamaha iyo talo siinta ku saabsan kala doorashada adeegyada.

Transit Link

651-602-LINK (5465)

*www.transitlinktc.org*

## Faah-faahinta Adeegyada

### *Deegaanada*

Anoka/Ramsey: All of Anoka County and the Ramsey County communities of Arden Hills, Falcon Heights, Lauderdale, Mounds View, New Brighton, Roseville, St. Anthony and Shoreview.

Carver/Scott: Dhamaan degmooyinka Carver iyo Scott oo dhan

Dakota: Dhamaan Degmada Dakota oo dhan

Hennepin: Dhamaan Degmada Hennepin oo dhan

Ramsey/Washington: Dhamaan Washington oo dhan iyo magaalaha Degmada Ramsey ee Gem Lake, Little Canada, Maplewood, North Oaks, North St. Paul, St. Paul, Vadnais Heights, White Bear Lake, iyo White Bear Township.

### *Xaq-u-yeeladka*

Gaadiidka Transit Link waxaa heli karta cid walba oo ku nool nawaaxiyada gaadiidka dadweynaha ee caadiga ah aan inta badan laga helin. Safar walba balantiisa waa in horey loo sii qabsadaa. Transit Link waxa ay xaq u yeedahay inay ka codsato macmilka inuu tuso aqoonsi sawir leh.

Kolka aad soo wacda si aad balan u qabsato, balan-qabtahu waxa uu kaa caawin inaad ogaato in safarka caynkaa ahi uu ku jiro adeegyadaTransit Link ay bixiso iyo in kale. Hadii qaadida iyo soo celinta ay gaadiidka dadweynaha ee caadiga ahi sameyn karaan, waxay u badan tahay kolkaa in qaadidaasi aysan ku jirin qaaditaanada fidin karto Transit Link. Qaadida iyo dejinta waa inay u jirto masaafo ka dheer ¼ mayl goobta gaadiidka dadweynahu istaago xiliga Nofeember ilaa iyo Maarso, masaafo ka dheer ½ mayl goobta gaadiidka dadweynahu istaago xiliga Abril ilaa iyo Oktoober si ay xaq ugu yeelato qaadida Transit Link. Transit Link ma siin doonto wax qaaditaan hadiiba qofku uu u kala lugeyn karo meesha laga qaadayo iyo guriga xiligaa isaga ah.

Maadaama akhbaarta barnaamijku ay is-bedesho ayaan markii la joogaba, ka eeg shabakada (website),Transit Link ee www.transitlinktc.org wixii cusub ee akhbaar ah ee soo kordha.

### *Saacadaha*

Adeegyada Transit Link waxaa la heli karaa laga bilaabo 6 a.m. ilaa iyo 7 p.m., Isniin ilaa Jimce (Ogow: 7 p.m. waa xilliga ugu dambeeya ee guri geynta).

Kala soo xiriirTransit Link khadka 651-602-LINK (5465) si aad u hesho akhbaarta loo baahan karo.

## *Xaquuqda iyo Waajibaadyada*

### Macaamiisha Transit Link waa inay:

- Diyaar u ahaan inay fuulaan gaariga sedex daqiiqo gudahood waqtiga loo qabtay in la qaado.
- U muujiyaan xaq-dhowr iyo edeb macaamiisha kale
- U hogaansamaan nidaamka amaan ilaalinta iyo habraaca adeegyada
- Iska ilaaliyaan wax cunida ama cabida inta ay baska saaran yihiin.

### Raacayaasha Gadiidka Transit Link waxa ay fili karaan:

- Qaadid amaan iyo is-ku halaynba leh
- Shaqaalahe edebta iyo xirfada leh oo u adeega macaamiisha
- Darawalo xirfad leh oo si fiican loo carbiyey
- Darawalo aqoonsi wata oo si quman oo xaraga ah u labisan
  Gadiid si fiican loo dayactiray oo aan lahayn qashin sigaarna aan lagu dhex cabin.
- Qaaditaano la wadaago, macnahu waa in macaamiil kale ay dhici karto in la qaado ama la dejiyo inta aad adigu gaadiidka saaran tahay.

## *Balamaha iyo Qaaditaanka*

Si aad u qabsato balkan qaadid ah, wac khadka Transit Link ee 651-602-LINK (5465) maalmaha la shaqqeeyo inta u dhaxeeysa 7 a.m. ilaa iyo 3:30 p.m. Ugu horeeyn noo sheeg, degmadaada lagaa soo qaadayo. Kolka aad sheegto degmadaada, waxaa laguu gudbin qofka qabanaya hawsha codsigaaga.

Waxaa lagu waydin doonaa dhowr su'aalood oo ay ku jiraan:

- Maalinta safarka
- Waqtiga qaadida la codsaday ama waqtiga balanta
- Ciwaanka qaadida
- Ciwaanka dejinta
- Inta qof ee gaariga adiga kula raacaysa, oo uu ku jiro qofka ku haya ee kugu qoran

Helitaan qaaditaanada la codsadaa oo dhami waxa ku xiran yihiin in boos loo hayo iyo in kale– hubaal ah in la heli karo lama bixin karo. Qaaditaanada waxaa horey loo qabsan karaa ilaa iyo shan cisho. Waad codsan karaa qaadid isla maalinta codsiga lagu qaadayo, laakiin, waa inay ugu yaraan u dhaxeeysaa labo saacadood waqtiga aad qaadida codsatay iyo waqtiga aad jeceshay in lagu qaado. Marba hadii balan la qabto, balan-qabtaha looma ogola inuu wax ka bedelo codsigii hore. Hadii macmil uu rabo waqti ka duwan waqtiga la heli karo, balan-qabtahu waa uu baajin codsigii hore ka hor inta uusan balan cusub qaban. Qaaditaanada isla maalinta codsiga la isqaadayo hubaal ma aha in la heli doono waxaana dhici karta inaanba gabi-ahaanba la aqbalin xiliyada hawadu xun tahay.

**Qaaditaanada maalmaha:**
Isniinta

Talaadadda

Arbacada

Khamiista

Jimcaha

*Sabtida

*Axadda

**U soo wac sidii degdeg ahayd ee markii hore**
Isniinta

Talaadadda

Arbacada

Khamiista

Jimcaha

*Sabtida

Friday

Friday

*iyadoo hadba ku xiran helitaanka

## Baajinta Qaaditaan

Hadii aad u baahan tahay in aad baajiso balan la qabtay (oo ay ku jirto qaaditaanka dalabka joogtada ah) degdeg u wac Transit Link, laakiin, yeysan ka dib dhicin wicidaasi hal saac waqtigii loo qabtay in lagu qaado. Waa aad baajin kartaa qaadidaadda hadii aad si toos ula hadlasho balan-qabte ama aad isticmaasho qalabka cod ka jawaabida ee loo soo gaabiyo (call).

## Kirada

- $4.50 halkii safar ee ha jiho u jeeda saacadaha ugu qaalisan – 6 to 9 a.m. iyo 3 to 6:30 p.m.
- $3.50 halkii safar ee ha jiho u jeeda – 9 a.m. ilaa 3 p.m.
  Safarada ka dheer 15 ka mayl waxaa lagu daraa 75-senti oo siyaad ah.

Waad ku bixin kartaa kirada lacagta ku jirta kaarkaaga (Go-To Card) ama waxaad ku bixin kartaa cadaan. Darawadala looma ogola inay sarif bixiyaan hadii aad kirada ku bixinayso cadaan. Waxa aad ka gadan kartaa Kaararka (Go-To Cards) intooda badan dukaamada Cub Foods. Booqo shabakada *www.metrotransit.org* si aad uga hesho goobo kale oo aad ka gadato kaararka (Go-To Card).

Hadii aad ku bixinayso lacag cadaan ah kirada aadna doonayso inaad ku wareegto bas ama tareen kale si aad u gaarto meesha aad doonayso, waa inaad waydiiso darawalka wareejin inuu ku siiyo kolka aad bixinayso kirada. Hadii aad sii raacayso basaska caadiga ah ee magaalada, waxa aad ku raaci kartaa wareejinta aad ka qaadatay Transit Link baska magaalada. Hadii aad kirada ku bixinayso Kaarka (Go-To Card), wareejintu jaa waxa ay ku jirtaa kaarka. Wareejinada Transit Link waxa ay dhici labo saac iyo bar ka dib kolka la bixiyey. Lacag kale oo dheeraad ah ayaa marmarka qaarkood loo baahdaa in la bixiyo.

Hadii socodkaagu ku bilowdo raacida gaadiidka magaalada, ka qaado darawalka wareejin ama qaado tigidhka tareenka. Kuwaa waa in la tusaa darawalka Transit Link si loo xaqiijiyo in lacagtii la bixiyey. Waxaa dhici karta in bixin lacago kale oo siyaado ah loo baahdo iyadoo hadba ku xiran dherarka safarka Transit Link (ka eeg jaantuska kirada).

## Goymaha Balamaha

Hadii aadan baajin balan ugu yaraan hal saac ka hor waqtiga loo qabtay in lagu qaado waxaa loo tix-gelinayaa balantaa inaad u goysay. Hadii aad sedex balamood u goyso muddo 30-cisho gudahood ah, waxaad heli warqad digniin ah. Hadii aad balamo kale u goyso 30 ka-cisho ee soo socota waa lagaa joojin adeegyada, Transit Link waxay kaloo joojin doontaa wixii dalab joogta ah ee aad haysatay. Transit Link na kuuma ansaxin doono muddo labo iyo tobon bilood wax dalab joogta ah oo cusub.

Hadii aad u goyso balamahaaga qaadida ah, balanta soo celinta ah iyana waa la iska baajin. Ka hor inta aadan codsan dalabta jooga ah oo cusub, waa inaad isticmaasho adeegyada sedex asbuuc oo is-xiga adigoon wax balan ah aan u goyn.

# KIRADA (Jaho walba)

Waqtiga qaaliga ah $4.50

(maalmaha la shaqeeyo 6 a.m. to 9 a.m. iyo 3 p.m. to 6:30 p.m.)

Waqtiga aan qaaliga ahayn 3.50

(Dhamaan waqtiyada kale ee adeega)

Ilmaha 5 jirka ah ama ka yar lacag la'aan ayey ku raacaan gaadiidka

Safarada ka dheer 15 ka mayl waxaa lagu daraa 75-senti oo siyaad ah.

## GOYNTA BALAMAHA

| | |
|---|---|
| Joojinta Koowaad & labaad (12 bilood gudahood) | Ma jirayso wax qaadid ah muddo 30-cisho ah |
| Joojinta Sedexaad (12 bilood gudahood) | Ma jirayso wax qaadid ah muddo 45-cisho ah |
| Joojinta Afraad (12 bilood gudahood) | Ma jirayso wax qaadid ah muddo 60-cisho ah |
| Joojinta (12 bilood gudahood) | Ma jirayso wax qaadid ah muddo 90-cisho ah |

Ogow: Joojin kasta oo ka koreeysa joojinta afraad waxa ay ku dari kuwii hore 30-cisho oo ganaax ah.

Wixii goyn ah ee kale ee ka horeeya joojinta waxa ay sii dheerayn mudadda joojinta labo asbuuc.

Hadii macmil uu u gooyo labo balamood oo qaadid ah oo is-xigta, dhamaan wixii balamo ahaa ee uu mustaqbalka lahaa waa la xayiri, wakiil ka socda xafiiska macmilada ayaan hal mar isku dayi inuu la soo xiriiro macmilka. Dhamaan qaaditaanada oo dhami waa ay xayirnaan ilaa iyo inta macmilka war laga helayo oo uu ka cadeynayo in uu doonayo inay u sii furnaadaan adeegyadu. Dhamaan wixii dalabyo joogta ahaan waa la tir-tiri hadii aan macmilka laga helin wax jawaabo ah 30-cisho gudahood.

Rakaabku waa ay ka doodi karaan wixii goyn ah ee lagu soo eedayo ama wixii xayiraad ah ee la saaro ka dib kolka ay helaan warqada digniinta ama mida xayiraad saarida; habraaca hawshaa waxaa lagu sharxi warqada. Xayiraadahu waxay saameynayaan dhamaan adeegyada ay bixisoTransit Link.

## Waxyaabaha kale ee la tixgeliyo ee qaaditaanka quseeya

Halkii qof ee weyn waxaa la raaci karta baska ilaa iyo afar ilmood. Ilmaha 4 ta sanno ka yar ama culeyskoodu yahay 40 rodol ama in ka yar waa inay ku jiraan kursiga ilmaha lagu xiro kolka ay gaadiidka saaran yihiin. Dadka waaweyn ayaa mas'uul ka ah keenida si quman ugu xirka ilmaha kursiga. Ilmaha 10 jirka ah ama ka weyn waa loo ogol yahay inay raacaan gaadiidka Transit Link iyagoo aan qof weyni wehelin, laakiin balanta qaadida waa in qof weyni qabtaa.

Macaamiisha waxaa loo ogol yahay inay wadan karaan ilaa iyo afar bacood oo kuwa adeega ah ayna ka codsan karaan darawalka gargaar. Darawalada looma ogola inay siiyaan wax gargaar ah oo intaa dheer, si loo sugo amaankooda iyo amaanka macaamiisha.

### *Soo Qaadida*

Darawadala Transit Link waxa ay yimaadaan 30-daqiiqo gudahood waqtiga qaadida. Matalan, hadii waqtiga soo qaadidu u yahay 1 1 p.m., gaariga waxa uu imaan waqtiga u dhaxeeya 1 p.m. iyo 1:30 p.m., waxaana kolkaa loo tix-gelin inuu ku yimid waqtigii loogu "tala galay" inuu yimaado.

Qaadidu waa lacag la'aan hadii gaarigu yimaado hal saac ka dib waqtigii loo qabtay inuu yimaado.

Rakaab waxaa lo ogol yahay sedex daqiiqo inay ku fuulaan baska kolka uu yimaado. Kolkaa ka dib, basku waxa uu dhaqaaqi isagoo uusan saaranayn qofkii rakaabka ahaa qofkaa kolkaa waxaa loo tix gelin inuu balantaa gooyey. Hadii macmilku uu u gambiyo balan qaadid ah (goyn), laakiin uu u baahan yahay in la soo celiyo, macmilku kolkaa waa inuu soo waco Transit Link si uu ula socodsiiyo inuu wali u baahan yahay in la soo celiyo.

Hadii gaarigu uu yimaado ka hor waqtigii qaadida loo qabtay, waqtiga sedexda-daqiiqo ahi waxa ay ka bilaaban waqtiga loo qabtay soo qaadida. Qaadidu waa lacag la'aan hadii gaarigu yimaado muddo ka badan hal saac ka dib waqtigii loo qabtay soo qaadida.

## *Ku wareegida Gaadiidka kale*

Macmilku waxa uu uga wareegi karaa gaadiidka Transit Link gaadiidyada kale ee magaalooyinka ka dhex shaqeeya. Rakaabka Transit Link waxaa la waydiiystaa kaliya inay uga wareegaanTransit Link boosteejooyinka waaweyn ee gaadiidka dadweynaha ama goobaha gawaarida ka dhigto ka dibna laga raacno gaadiidka dadweynaha (park-and-ride). Boosteejooyinkaa ama goobahaa waxay leeyihiin astaamo lagu garto sida nalal waaweyn oo iftiima, wado basasku inta badan maraan iyo meelo gabaad ah oo rakaabku ku gabado. Matalan: Brooklyn Center Transit Center, Cottage Grove Park and Ride, Foley Boulevard Park iyo Ride, Mall of America, Maplewood Mall, Ridgedale Mall, Rosedale Mall, iyo Sun Ray Shopping Center. (ka eeg khariidada bogga 2.)

Tusaaale ahaan, macmilka ka imaanaaya Shoreview oo u socda beledka hoose ee Minneapolis waxa uu u qaadan karaa Transit Link rug kale oo gaadiid, sida Rosedale, ka dibna waxa uu u qaadan karaa inta socodkiisa ka dhiman gaadiidka caadiga ee magaalooyinka.

## *Xalinta Khilaafaadka Adeegyada*

Transit Link ma dhayalsato dhamaan wixii warbixino askhtakooyin ah ama dhacdooyin dhib ah ee soo gaara. Waxaa naga go'an inaan ku siino adiga heerka adeeg ee ugu sareeya adeeg cidi bixiso. Macaamiisha ku dhex jirta 90 daqiiqo baska ama hadii lagu soo qaado muddo ka badan hal saac ka dib kolkii ay ahayd in lagu soo qaado, qaadidaaddu waa lacag ala'aan.

Ashtakooyinka ku saabsan adeegyada Transit Link waa in marka hore lagu hagaajiyaa cidii adeega bixisay. Macaamiishu waa in ay jawaab ku helaan labo cisho gudahood.

Hadii cidii adeegaa bixisay aysan arrinta wax ka qaban, fadlan wac khadkaTransit Link ee 651-602-LINK (5465) ama taabo "9" si aad fariin ugu dhaafto santuukha codad reebida ee macmilka. Ha ku dhaafin fariin ku saabsan sameyn balan ama baajin qaadid santuukha codad reebida ee guud ee Transit Link. Waa khasab inaad la hadasho balan qabte si aad u sameyso balan ama aad u baajiso qaadid.

Kala xiriir Adeeg bixiyaasha khadka ah 651-602-5465 wixii kaaga dhex dhuma gaadiidka ku qaada.

Kaararka faallooyinka lagu qoro waxaa laga heli karaa dhamaan basaska Transit Link. Faallooyinka ku saabsan adeegyada la bixiyo sidoo kale waxaa loogu soo diri karaa emayl ahaan ciwaanka *TransitLink@metc.state.mn.us*. Shaqaalaha ayaa baari jawaabna ka bixin shan cisho gudahood.

## Dafuufaha Gaarka ah

## Rakaabka ay sugay ADA-du inay xaq uleleeyihiin Adeegyada

Transit Link waa gaadiid dadweye.  Ma aha Metro Mobility. Dhamaan gaadiidka Transit Link waxa ay ku qalabaysan yihiin wiishash ka soo baxa ama wax dheer sharuudaha uu u baahan yahay sharciga ADA ee naafadu, sidaa awgeed, macaamiisha ADA-du ay sugtay inay xaq u leeyihiin adeegyadu waxa ay isticmaali karaan Transit Link si ay ugu xirmaan deegaanada ay u adeegto Metro Mobility. Intaa waxaa dheer, macaamiisha ADA-du ay sugtay ee u isticmaalaya Transit Link meelo ka baxsan deegaanada ay u adeegto Metro Mobility waxa ay codsan karaan gargaarid ka albaab ka albaaba ah. Macaamiishu waa in ay codsadaan gargaarka dheeraad ah ee ay u baahan yihiin kolka balanta qaadidaa ah ay qabsanayaan. Gaadiidka Transit Link ma qaadaan qalabka gargaarida socodka ee

balaciisu ka weyn yahay: 30 hiis (ama) 48 dhudhun (ama) 600 oo rodol ama isku dar miisaanka rakaabka iyo aala. U hogaansamin la'aanta habraacyadu waxa ay dhalin karaan ciqaabo ay ka mid yihiin xayiraad, iyo in la yiraahdo waa in qofka (PCA) hayntu ku soo raacaa mar walba ama diido adeegyada Transit Link ay fidiso.

Macaamiisha u baahan in lagu caawiyo aalada lagu socdo ama wax kale oo gargaar oo khaas ah waa inay soo kaxaystaan qofka ku qoran ee haya. Rakaabka xaq u leh adeegyada ADA-da waa uu la raaci karaa qafka ku qoran ee hayaa gaadiidka Transit Link. Kolka ay qabsanayaan balanta, macaamiishu waa inay ogaysiiyaan in qofka ku qorani uu soo kale la raaci doono gaadiidka. Hal qof oo hayaha ah ayaa loo ogol yahay inuu raaci karo qofka xaq u leh adeegyada ADA da.

### Xayawaanka

Waa la ogol yahay in xayawaan kula raaco gaadiid Metro Mobility. Laakiin waa in xayawaanka aad xakamayso waana in uu dhulka sagxadiisa ama dhabta macmilka ku fariisto ama jiifsado ee uusan kursi ku fariisan. Macaamiishu waa la raaci karaan basaska Transit Link xayawaanada yar yar ee rabaayada ah hadii boos loo hayo ayna santuukha lagu qaado ku jiraan.

## *Faystooyinka*

Gadiidka Transit Link ma shaqeeyaan faystooyinkan soo socda ee la xuso: Thanksgiving Day, Christmas Day iyo New Year's Day. Dalabyada joogtada iyana waa la baajin hadii uusan codsan rakaabku faystooyinkan soo socda in la qaado: Memorial Day, Independence Day, Labor Day iyo maalinta ka dambaysa Thanksgiving Day.

## *Dalabyada Joogtada ah*

Macaamiisha qabsada balamaha safarada joogtada ah si ay shaqo u aadaan, ama balan dhaqtar u aadaan ama hawl-kaleba u qabsadaan waxa ay codsan karaan dalabka joogtada. Balamaha dalabyada joogtada ah maalin walba waa la qabtaa, ama dhowr goor ayaa asbuucii la qabtaa ama waqti iyo maalin isku mid ah ayaa la qabtaa asbuuc walba. Dalabyada Joogtada ah dib ayaa loo eegaa loona qabtaa bil walba mar hadii boos banaan yahay waqtiga la codsiday. Dalabyada joogtada ahi waxa ay ku kooban yihiin uun boqolkiiba 75 safarada deegaanka loo adeegayo xilliyada saacad kasta oo maalintii ha. Qaar ka mid ah codsiyada dalabyada joogtada ah waxaa dhici karta inaan la aqbalin kolka la eego mugga.

Macaamiishu waxa ay bedeli karaan ilaa iyo afar goor dalabyada joogtada ah sannadkii. Si bedelaad loo sameeyo, macmilku waa khasab inuu la soo xiriiro adeeg bixiyaha ugu yaraan 21 cisho ka hor waqtiga bedelaada la doonayo inay dhaqan gasho. Dhamaan bedelaadaha oo dhami waxay ku xiran yihiin in boos la hayo iyo in kale. Bedelaadaha waxaa ku jiri kara mid kasta oo mid ah kuwan soo socda:

- Bedelida meesha la iska qaadayo ama meesha la is geynayo
- Ku darrida hal ama in ka badan oo maaalmo ah balamaha
- Bedelida waqtiga qaadida

Dalabyada qaadida waxaa gaar meel loogu dhigaa macaamiisha sida joogtada ah u safarta.  Hadii macmil baajiyo ama uu u gooyo boqolkiiba 50 balamahiisa dalabka joogtada ah muddo labo-bilood ah gudahood, macmilkaa waxaa loo soo diri kolkaa warqad digniin ah. Hadii macmilku baajiyo ama uu u gooyo balan mudadda labada bilood ah ee waqtigaa xigta, kolkaa dalabka joogtada ah waa la joojin. Hadii dalabka joogtada ah la joojiyo, macmilka looma ansaxin doono dalab cusub oo joogta ah muddo 12 bilood ah.

Macmilku waa uu codsan karaa in dalabka joogta ah loo hayo muddo ilaa iyo lix asbuuc ah sanad gudahii. Macmilku waa inuu la soo xiriiro adeeg bixiyaha si uu u codsado in dalabka joogtada loo sii hayo. Qaaditaanada dalabyada joogtada ee faystooyinka soo socda iyana waa la baajin hadii uusan codsan rakaabku in la qaado maalmahaa: Memorial Day, Independence Day observed, Labor Day, iyo maalinta ka dambaysa Thanksgiving Day iyo Christmas Eve.

Wixii akhbaar ah ee dheeraad ah ee ku saabsan sida loo codsado dalabyada joogtada ah kala xiriir, khadka Transit Link ee 651-602-LINK (5465). Kolkii lagu waydiisto, xulo degmada aad ku nooshahay.

Transit Link waa gaadiid dad-weyne oo laga heli karo dhamaan todobada-degmo ee nawaaxigan. Waa adeeg ka kadin-ka-kadin ah, oo leh gargaarid kooban. Transit Link waxa ay u adeegtaa meelaha aan laga helin adeegyada gaadiidka dadweynaha ee caadiga ah. Wixii akhbaar ah ee dheeraad ah ee aad u baahto waxaad heli hadii booqato shakabada *www.transitlinktc.org*.

Transit Link waa adeeg ay fidiso hay'ada Metropolitan Council, oo ah hay'ad qorsheyn nawaaxiyeed u adeegta todobada degmada ee hareeraha Magaalooyinka Mataanaha ah (Twin Cities metropolitan).